

Taageerada Qoysaska haysta Carruurta Maqalka La' iyo Kuwa Maqalku ku Adag Yahay




Meel Kasta Ood Joogto, Waanu Kula Joognaa.

Adigaa garanaya waxa ilmahaaga u fiican. Wawaanu kaa caawin karnaa sahaminta doorashooyin badan oo kala duwan si aad u ogaato kuwa sida ugu fiican u anfacaya qoyskaaga. Minnesota Hands & Voices (MNH&V) waa bulsho ka kooban qoysas meelo kala duwan ka yimid gobolka oo dhan oo leh carruur Maqal La', Maqal La'-Arag La' iyo Kuwa Maqalku ku Adag Yahay. Wawaanu heegan u nahay inaanu ku siino taageero, macluumaad iyo khayraad.

Taageerada Waalidka

Labadayada barnaamij waxay ka kooban yihiin Guide By Your Side™ (GBYS) iyo Advocacy, Support and Training (ASTra™). Waalidiinta iyo dadka waawayn ee Maqalka La' ama Maqalku ku Adag Yahay waxay u yihiin "hagayaal" qoysaska hadda uun ogaaday in ilmahooda maqalkiisu aanu caadi ahayn, ama kuwa leh carruur waawayn una baahan taageerada gaarka ah ee qof kale oo isaga arrintan oo kale hore ugu dhacday oo la wadaagi kara waay-oaragnimada iyo xigmadda uu dhaxlay. U-doodayaashayada ASTra™ waxay taageero siiyaan qoysaska leh carruur maqalka la' ama maqalku ku adag yahay marka ay kooxda dugsiga kala shaqaynayaan hannaanka waxbarasho. Dhammaan shaqaalahaygu waxay taageeraan qoysaska iyagoon wax eex ah ku samaynayn nooca iyo habka xiriirka, ama deegaanka waxbarasho sidaa darteed ilmo kasta oo ah mid maqalka la' ama maqalku ku adag yahay wuxuu fursad u haystaa in heerka ugu sarreya ee suurtgal ah uu gaaro. Xiriirka dhanka taleefanka ama booqashooyinka fool-ka-foolka ah waa u bilaash dhammaan qoysaska wakhti kasta oo adiga iyo qoyskaaga u haboon.

Haddaanu nahay waalidiinta iyo dadka waawayn ee maqalka la' ama maqalku ku adag yahay wawaanu leenahay waayo-aragnimo qoto-dheer ee korinta iyo taageeridda carruur kala duwan oo badhaadha kuwaasi oo ah kuwa maqalka la' iyo kuwa maqalku ku dag yahay. Wawaanu si fiican u naqaanaa dareennada, go'aamada iyo su'aalaha qoysaska aanu u adeegno. Anagoo adeegsanayna waayo-aragnimadayada, wawaanu rajaynaynaa inaanu kordhino awooddaada si aad doorashooyinka ugu fiican ilmahaaga ugu doorto.



Waxa Anfacaya Ilmaagu waa Waxa Keenaya Doorashada Saxda ah



MNHandsandVoices

Minnesota Hands & Voices waxa qayb ahaan maalgaliya Minnesota Department of Health.

Ma Laha Xuduud in Ilmaagu Guulaysto

Dhacdooyinka iyo Waxbarashada

Sanadka oo dhan, waxaan ugu qabanaa dhacdooyin bilaash ah gobolka oo dhan qoyska leh ilmo maqalka la' ama maqalku ku adag Yahay.

- Waalidiinta waxay fursad u haystaan inay ka bartaan xeeldheerayaasha deegaanka mawduucyada arrintan la xiriira
- Carruurta iyo walaalahood waxay ku raaxaysanayaan hawlo la hagayo, cuno-fudud iyo bulsho-dhexgalid
- Qoyska oo dhan wuxuu la kulmi karaa dadka tusaalaha ah ee ah kuwa maqalka la' ama maqalku ku adag yahay waxayna la sheekaysan karaan M NH&V Guides

Wixii Soo Kordha la Soco

Marka laga tago dhacdooyinka, waxaanu ku siin karnaah khayraadyo kale nolol maalmeedkaaga oo dhan. Booqo websaytkayaga, isu diiwaangali warsidahayaga saddex-billoodlaha ah iyo emayladayada toddobaadlaha ah, oo nagala soco warbaahinta bulshada si aad u hesho warkii ugu dambeeyay iyo macluumaad sugaran, ee deegaanka iyo waddanka oo dhan ah.

Halkan Minnesota Hands & Voices, waxaad ka helaysaa:

- il macluumaad oo aan eex lahayn.
- taageero waalidku ay kala helayaan.
- ku helidda adeegyada oo dhan si bilaash ah.



**709 University Avenue West
Saint Paul, MN 55104**



651.265.2435



mnhv@lssmn.org



mnhandsandvoices.org



[mnhandsandvoices](#)



**Lutheran
Social Service
of Minnesota**

©2022. Minnesota Hands and Voices waa barnaamij ay leedahay Lutheran Social Service of Minnesota.
06/2022